Tirada Taxanaha **503.8AR** La ansixiyey **Oktoober 2012** Dib lo habeeyey **Qabyo-qoraal 2023**

Ciwaanka **Mamnuucida Maagida**

1. **Ujeedadda iyo Xadka**

1.1 Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan deegaan amaan ah oo ka caagan wax hanjabaad ah inaba inta ay iskuulka joogaan, ay ku jiraan hawl iskuulka la xiriirta ama saaran yihiin gaadiid uu iskuulku leeyahay. Maagidu waxa ay carqaladeeysaa awooda uu ardaygu wax ku baran karo iyo awoodka macallinku uu wax ku bari karo ardayga iyagoo ku sugan deegaan amaan ah. Maadaama maagidu ay saameyn ku yeelato deegaanka wax barashada ee iskuulka, kolkaa iskuulka waxaa ka go'an in uu ka hortago maagidi ay dhaco uuna baaro waxna ka qabto maagidii dhacda ee aan laga hor tagin.

Xeerkani waxa uu quseeyaa noocyada kala duwan ee maagida oo ay ku jiraan aanse lagu koobin cawaandiyada intarnadka, xumaanta iyo edeb-darada, iyo ka faa'idaysiga galmo kuwaasoo ka dhaca:

1.1.1 iskuulka dhexdiisa, hawlaha ama xafladaha iskuulka ama gaadiidka iskuulka;

1.1.2 Iyadoo la isticmaalayo qalab koronto ku shaqeeya iyo xidhiidhka iyadoon iskuulka la joogo, xiliga hawl iskuul leeyahay lagu jiro, ama gaadiidka iskuulka ama iyadoo la istcimaalayo kumbuyuutar iskuulku leeyahay, madal, iyo liiska boostada, ama

1.1.3 Iyadoo la isticmaalayo qalab koronto ku shaqeeya iyo xidhiidhka iyadoon iskuulka la joogo, waa hadii isticmaalka caynkaa ahi si uu weyn oo la taaban karo u carqaladeeyo wax barashada ardayga ama jawiga iskuulka.

1.2 Canug da'da iskuulka gaaray oo si iskii ah uga qeybqaata waxqabad iskuulka oo fagaare ka dhacaya, sida waxqabad manhajka kabaxsan, wuxuu u hoggaansamayaa xeerkan xitaa haddii si kale uusan uga diiwaangashaneyn degmo dugsiyeedka.

1.3 Iyadoo inta badan anshaxa uu mamnuucayo xeerkan uu ku kooban yahay anshaxa u dhexeeya arday iyo arday, mamnuucitaanada gaarka ah ee ku saabsan ka faa'iideysiga galmada, iyo habdhaqanka gardarrada iyo xumaan u geysashada qofka ayaa sidoo kale khuseeya ardayda, xubnaha ka tirsan shaqaalaha degmada ama iskuulka iyo qandaraaslayaasha madaxa bannaan.

2. **Dhaqanka ku dheehan xaq dhowrka.**

Dhamaan iskuulada District 196 waxaa laga rabaa inay sameeyaan dhaqan leh ixtiraam. Degmada iyo iskuuladu waxay sameeynayaan xeelado lagu sameeynaayo jawi fiican oo loo isticimaalayo cadayn ku salaysan dareenka bulsho si looga hortago oo loo yareeyo midabtakoorka iyo waxyaabaha kale ee ku haboon dhaqanka. Shaqaalaha iskuulku waxa ay dhisi, bari ayna dhaqan gelin hab dhaqanada la iska rabo iyagoo isticmaalaya dhab-dhaqan wanaagsan oo haboon oo cilmi baarid ku salaysan oo ay ku jiraan talaabooyin ka hor tag iyo toosin ah iyo edbin taabo gal ah si looga joojiyo maagida iskuulka oo dhan. Iskuul walbaa isaga ayaa xor u ah uu doorto barnaamij si fiican ugu adeegi kara ardaydooda, laakiin dhamaan iskuulada oo dhan waa in ay dhaqan galiyaan barnaamijka looga ilaalinayo maagida iskuulka oo dhan oo qayb ka ah barnaamij lagu gargaarayo

dhab dhaqanka wacan. Barnaamijkaasi waa in uu dhaliyaa ka qayb gal fiican oo ardayda, waaldiinta iyo bulshaduba.

3. **Qeexitaanada**

3.1 Ujeedooyinka qawaaniintan waa qeexida maagida macnaheeduna waa falaka caga-jugleynta, hanjabaada, dhaarta, tacadiga ama waxyeelida anshaxa oo ah weerar cad iyo:

3.1.1 Jiritaan awood aan isu miisaanayn oo u dhaxeeysa ardayga falka sameynaya iyo kan lagu sameynayo iyo kolka falkaas noqdo mid soo noq-noqda ama joogtooba, ama.

3.1.2 Uu falkaasi si weyn oo la taaban karo carqalad ugu noqdo wax- barashada ardayga ama awooda ka qayb galka hawlaha iskuulka ama helida manfacyada, adeegyada iyo gargaarada gaarka ee iskuulka.

3.2 Ujeeddooyinka qaanuunkan awgeed, xoog-sheegashada internetka waxaa lagu qeexay xoogsheegashada iyadoo la adeegsanayo teknolojiyad ama isgaarsiin elektaroonig ah oo kale oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, u gudbinta calaamadda, calaamadda, qoritaanka, sawirka, codka, ama xogta, oo ay ku jiraan boostada shabakadda bulshada degel ama madal, lagu kala qaado kombuyuutar, taleefanka gacanta, ama qalab kale oo elektiroonig ah si loogu cagajugleeyo mid kale.

3.3 Ujeedooyinka xeerkan, cabsigelinta, hanjabaada, xadgudubka, ama waxyeelada leh waxaa laga yaabaa inay lug ku yeeshaan, laakiin aan ku xadidneyn, anshaxa keena waxyeelo jirka ah ardayga ama hantida ardayga; sida ku qoran xeerka guud ee gobolka Minnesota wuxuu ku xad-gudbaa rajada macquulka ardayga ee qarsoodiga ah, in ardayga lagu dhufto, ama u keeno ardayga niyadjab maskaxeed; waxaa lagu dhaleeceynayaa arday ama arday kasta oo ay ku jiraan kuwa ku saleysan shakhsi dhab ah ama loo arko qoladiisa, jinsigiisa, midabkiisa, caqiidiisa, diintiisa, asalkiisa qaran ahaan, imigrad ahaan, lab iyo dhedig, guurka, xaaladda qoyska, xaaladda dhaqaale, muuqaalka jinsiga, doorashada, oo ay ku jirto inuu qofku isku aqoonsado rag ama dumar, waxbarashada ardayga, curyaanimo ama xaalad la xiriirta kaalmada dadweynaha, da'da, ama sifooyinka kale ee lagu qeexay Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota (MHRA). Si kastaba ha ahaatee, dhaqanka mamnuucaya uma baahna in uu ku saleysnaado sifooyin gaar ah oo lagu qeexay cutubkan ama MHRA. Maagida_waxa ku jira xumaanta iyo edab darada sida lu sharxay qeybta 3.4 iyo ka faa'idaysiga galmo.

3.4 Ujeedooyinka xeerkan, habdhaqanka gardarrada iyo xumaan u geysashada qofka ee ku lugta leh isir, midab, caqiido, asal qaran, jinsi, da'da, xaaladda guurka, xaaladda la xiriirta kaalmada dadweynaha, naafanimada, diinta, dhibaateynta galmada, iyo jihada galmada iyo aqoonsiga jinsiga (sida lagu qeexay Xeerarka Minnesota, cutubka 363A) waa mamnuuc. Mamnuucistani waxay si gaar ah u khuseysaa ardayda, qandaraaslayaasha madaxa bannaan, macalimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale ee iskuulka. Habdhaqanka gardarrada iyo xumaan u geysashada qofka waxaa laga wadaa abuurista jawi waxbarasho oo colaadeed iyadoo ujeedada loogu dhaqaaqayo ay tahay waxyeelleyn iyadoo si ula kac ah loo dhaawacayo qofkale sabab la'aan ama lagu lug yeelanayo cadaawad daran ama xadka kabaxsan ama loogu farxo cadaaweysiga.

4. **Soo sheegida**

4.1 Maamule kasta ee iskuul ama xiriiriyaha kasta ee barnaamij waxa uu u magacaabi mas'uul ka mas'uul ah qabashada warbixinada ku saabsan maagida noqdana cida lagala xiriirayo amuuraha la xiriira xeerkan. Sarkaalka loo xilsaaray wuxuu u igman karaa howlaha uu u baahan yahay qaanuunkan, laakiin wuxuu ilaaliyaa mas'uuliyada si loo hubiyo u hogaansanaanta qawaaniinta, oo ay kujirto dhaqamada soo celinta, jawaabaha edbinta iyo cunaqabateynta in si cadaalad ah oo dhameystiran loo fuliyo.

4.2 Cidii shaqaalaha ka mid ah ee ay soo gaarto warbixin, ama aragta, ama ka war qabta fal noqon kara maagid waa inay ku dadaashaa intii ay awoodo in ay wax ka qabato ayna xaliso maagaa ayna la socod siiso mas'uulka iskuulku u xil saaray qabashada war bixinada maagida. Habraaca la yiraa (Procedure 503.8P), ee Soo Sheegida Falalka Maagida ah (Report of Bullying Behavior), laakiin war bixino kale oo ay ku jiraan, warbixinada lagu soo gudbiyo kumbuyuutarka, iyagana waa in la tix galiyaa; hase yeeshee, degmo dugsiyeedka ma qaadi doonto tallaabo edbin oo ka dhan ah qofka(shakhsiyaadka) warbixinta laga gudbiyey iyadoo loo cuskanayo oo kaliya warbixin qarsoodi ah.

4.3 Shaqaalaha degmada oo dhan waxaa waajib ka saaran inay wax ka qabtaan xoog u sheegashada. Shaqaalihi kasta ee hela warbixin, arka, ama si kale uga warhaya ama rumeysan in habdhaqan noqon karo xoog u sheegasho waa inuu sameeyaa dadaalo macquul ah si uu wax uga qabto una xalliyo xoog u sheegashada uguna wargeliyo mas'uulka iskuulka u xilsaaran ee mas'uulka ka ah inuu qabto warbixinada xoog u sheegashada. Xubnaha katirsan shaqaalaha iskuulka ee ku guuldarreysta u sheegidda mas'uulka iskuulka u xilsaaran waxaa laga qaadi karaa tallaabo edbin ah.

4.4 Warbixinada maagida ama dhibida qofka waxaa loo kala saaraa sida mid gaar u ah waxbarashada iyo/ama macluumaad shaqaale iyo/ama macluumaad baaritaan sir ah oo aan la bixin aan ka ahayn marka sharcigu ogol yahay. Nidaamka helitaanka xogta iyo ka doodista saxsanaanta iyo dhamaystirka xogta waxaa laga heli karaa Xeerka Degmada 505.2AR, Ilaalinta rikoordhka Gaarka u ah Ardayga.

4.5 Soo gudbinta warbixinta maagida ee laqdaba la'aanta ahi ma saameyn doonaan soo gudbiyaha shaqadiisa mustaqbalka, buundooyinka, shaqada loo diro ama fursadaha wax barashada ama shaqooyinka ku saabsan.

4.6 Iskuulku waa uu ilaalin doonaa inta uu awoodo xogaha soo gudbiyaha, dhibahana, shakhsiga (yaadka) warbixinta laga keenay, iyo makhraatiyaasha, sida waafaqsan waajibaadka iskuulka ee ah in u baaro, talaabo munaasib ah uu qaado uuna fuliyo waajibaadka sharciyada bixinta akhbaarta.

4.7 Si kas ah u sameynta warbixin been ah oo maagid ku saabsan waa mamnuuc.

5. **Wax ka qabadka maagida**

5.1 Wixii maagid ah ee la soo sheegaa waa in ay iskuulka lug ku leedahay ka hor inta aan iskuulku mas'uul ka noqon baarida iyo edbinta cidii maagidaa gaysatay. Iskuulku lama socon karo waxa ardaygu sameynayo mar walba mana hor is taagi karo dhamaan wixii maagid ah ee ardayda dhexdeeda ah, gaar ahaan, marka ardaydu aysan si toos ah ugu jirin gacanta shaqaalaha iskuulka.

5.2 Kolka uu helo warbixin ah maagid, mas'uulka iskuulku u magacaabay waa inuu bilaabo ama amro baaritaan sida xeerkaani qabo sedex cisho gudahood. Baaritaankaani waa in la soo gaba-gabeeyo sida si ugu dhaqsaha badan. Baaritaanka waxaa lagu soo gaba-gabeyn doonaa sida ugu dhaqsaha badan ee lagu dhaqmi karo. Mas'uulka iskuul magacaabay ayaa ka mas'uul ah in uu hubiyo dhameystirka Wax ka qabadka Iskuulka ee Warbixinta Maagida la soo sheegay sida ku qeexan Habraac iskuulka ee (Procedure 503.8P), ee Soo Sheegida Falalka Maagida ah. Mas'uulka iskuulku magacaabay ama baaraha uu isagu wakiisho waa in uu isku dayaa in uu wareysto dhibanaha, shakhsiga warbixinta laga gudbiyey ee makhraati ah. Shakhsiga warbixinta laga gudbiyey waxaa la siin fursan uu isaga difaaco eedayntaa loo soo jeediyey.

5.3 Iskuulka waxaa dhici karta in uu qaado talaabooyin degdeg ah si uu ilaaliyo soo sheegaha, dhibanaha, Shakhsiga warbixinta laga gudbiyey iyo cid kaleba inta la sugayo baaritaanka gabo-gabowgiisa, sida ay qabaan sharciyada arrinta quseeya. Kolkii laga shakiyo gaysiga fal dambi ah, iskuulku kolkaa waxaa dhici karta in uu u sheego falkaa laga shakiga qabo in uu dambi yahay hay'adaha ilaalinta sharciga.

5.4 Marka la dhammeeyo baaritaanka sida uu dhigayo sharcigan, degmo dugsiyeedku waxay tallaabo ka qaadi doontaa qofkii lagu helo inuu ku kacay fal xoogsheegasho, aargudasho, warbixin ula kac ah oo been ah, ama oggolaaday, oggolaatay, ama u dulqaadatay xoogsheegashada. Tallaabada noocan ah waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn, wax ka qabadka dib u soo celinta, digniinta, ka joojinta, ka saarida, wareejinta, joojinta, ama sii deynta. Haddii edbinta dugsiga lagu soo rogo, waxay la jaan qaadi doontaa Xeerka Maamulka 503.3AR, Filashada Habdhaqanka Ardayda iyo Jawaabaha Dabeecadda. Degmadu waxay tixgelin siin kartaa arrimaha soo socda:

5.4.1 Heerka Garashada iyo caqliga cida hawsha ku lug leh;

5.4.2 Heerka waxyeelada, daruufaha arrinta, iyo nooca hab dhaqanka;

5.4.3 Dhacdooyin hore ama wax hore ama qaabka hab dhaqan oo wali jira;

5.4.4 Xiriirka ka dhaxeeya qolyaha arrintu dhex martay;

5.4.5 Qaabka dhacdadu u dhacday, iyo

5.4.6 Xoog saarida uu sharcigu xooga saaro si maslaxo ah wax uga qabadka

5.5 Mas'uuliyiinta iskuulka ayaa kula socod siin doonta muddo cayiman gudaheed waxa dhacay waalidka ama qofka mas'uulka ka ah dhibanaha ama Shakhsiga warbixinta laga gudbiyey ee maagida mudo macquula. Iskuulka looma ogola in uu bixiyo xogta qarsoodiga ah ee ku saabsan macluumaadka tacliinta iyo shaqaalaha ee ku taxa luqda arday ama shaqaale iskuulka u shaqeeya.

5.6 Lacala hadii in maagidi dhacday la xaqiijiyo, iskuulku waxa uu la yeelan doonaa kulan daba gal ah dhibanaha qiyaastii labo asbuuc ka dib kolka baaritaanka la soo gaba-gabeeyo si loo hubiyo in maagidii ay joogsatay. Hadii ay maagidii wali sii socoto, talaabooyin kale oo dheeraad ah ayaa la qaadi si loo joojiyo maagida, si qumana loo ciqaabo cida gaysatay falalkaa la mamnuucay. Iskuulku waxa uu siin doonaa akhbaar ku saabsan khayraadka laga dhex heli karo beesha, dhibaha,

Shakhsiga warbixinta laga gudbiyey iyo cidii kale ee arrintu saameysay, hadii taasi ay quman tahay.

5.7 Iskuulka loo xilsaaray ayaa ka mas'uul ah rikoodh kasta oo ka soo baxa baaritaanka iyo ilaalinta iyo nidaaminta helitaanka rikoordhka.

6. **Wada xiriirida iyo Tababarada**

6.1 Iskuul walbaa ardayda waxa uu sii doonaa akhbaar iyo casharo da'da ardayda ku haboon. Waxaa ku jiri doona akhbaartaa dib u eegid xeerkan ah, sida loo soo sheegi karo maagida, waxyeelada maagidu leedahay iyo waxyaabo kale oo quseeya ka hortagida maagida.

6.2 Iskuulku waxa uu soo saari doonaa *guud mar* ogaysiiska xeerkan ah oo qoraal sannad walba waxaa ogaysiiskaa lagu qoro *buuga gacanta ee Xaquuqda iyo Waajibaadka ardayga (Overview of Student Rights and Responsibilities),* buugaa oo la soo gelin shabakada (website) iskuulka, sidoo kale waxaana dhici karta in buugaa loo qaybiyo ardayda hadii uu iskuulku u arko in ay quman tahay taasi.

6.3 Habraaca Degmada oo Mamnuucaya Maagida am dhibida (District Procedure 503.8.1P, Summary of Bullying Prohibition), waa khasab in si joogta ah loogu dhajiyo darbiyada xafiiisyada maamulida ee dhammaan dhime iskuul walba iyo gudoonka waxbarashada dugsi kasta iyo iskuul kasta oo waa in ay aqoonsadaan si rasmi ah ama la helo warbixino xoog sheegasho ah waana in looga shaqeeyo ama la qaado xiriirka talaabada koowaad ee la xiriira arrimaha qawaaniintan

6.4 Xeerkan waa in la qeybiyaa shaqaale walba ee iskuulada iyo degmada, qandaraaslayaasha madaxa banana. Xeerarkan waxaa lagu dari doonaa tababarada la siiyo shaqaadalaha cusub ee shaqada bilaabaya.

6.5 Xeerkan waxaa lala falanqayn doonaa dhamaan tabarucayaasha Heerka 2 aad iyo Heerka 3 aad ah iyadoo la tix raacayo Habraaca Gudoonka ee Tabarucayaasha (District Procedure 806.5P). Tabarucayaasha waxaa lagu dhiiri galin doonaa in ay u soo sheegaan maamulaha iskuulka ama xiriiriyaha barnaamijka wixii maagid ah ee ay arkaan inta ay yihiin tabarucayaal iskuulka u adeegaya.

6.6 Shaqaalaha iskuulka waxaa loo tababari doonaa sida looga hor tago, loo garto, waxna looga qabto maagida. Tababaradaasi waxa ay dhici doonaan sedexdii sannaba hal mar, halka shaqaalaha cusub ee kolkaa la qoray shaqada la siin doono tababarkaa sannadka ugu horeeya ee shaqada ay bilaabaan. Tababarkaa waa inay ku jiraan

6.6.1 Xeelado ku haboon da'da ilmaha si looga hor tago waxna looga qabto markiiba iyo in si taabo gal ah loo fara gasho si loo joojiyo maagida;

6.6.2 Arrimaha cakiran ee saameeya, falaha, ama dhibanaha ama makhraatiga;

6.6.3 Cilmi baarista maagida, oo ay ku jiraan in ay jiraan qaar ardayda ka mid ah oo si gaar ah khatar ugu ah maagida inta iskuulka la joogo;

6.6.4 Dhacdooyinka ama nooca ay yihiin kumbuyuutar ku maagida,

6.6.5 Amaanka shabakada (internet) iyo kumbuyuutar ku maagida,

6.7 Xeerkan nuqulkiisa ayaa kumbuyuurka loogu diri doonaa Wasiirka Wasaaradda Waxbarashadda ee Gobolka Minnesota.

6.8 Kolka ay quman tahay si looga hor tago waxna looga qabto maagida ardayda naafada ah, ardayga IEP giisa ama qaybta la yiraa qorshaha 504 waxaa dhici karta in ay wax ka tiraa xirfadaha iyo aqoonta uu ardaygu u baahan yahay si uu uga jawaabo maagida uusana asagu laftiisu u sameyn maagid.

7. **Aarsiga**

Iskuul waxa uu ka qaadi talaabo munaasib ah cidii ka aarsata cid si daacad ah oo aan laqbada lahayn u soo sheegta maagid, ama cidii makhraati ka noqota, caawisa, ama ka qayb gasha baaritaan ama cidii makhraati ka noqota, caawisa ama ka qayb gasha dacwad ama dhagaysi la xiriira maagida caynkaa ah. Aarsiga waxaa ku jira laakiin uusan ku wada koobnayn, wixii caga-jugleyn ah, aarsi ah, khakhashaad ah ama si kas ah u xumeyn ah. la macaamilka. Ka jawaabista aargoosiga waa inay waafaqsanaadaan Xeerka Maamulka 503.3AR, Habdhaqanka Laga Filayo Ardayga iyo Ka Jawaabista Habdhaqanka, iyo qodobada lagu aqoonsaday qeybta 5.4 ee xeerkan.

8. **Khashkhashaada**

Iskuulku wuxuu mabnuucayaa khashkhashaadka, takoorka ama rabshadaha ku saleysan jinsiga, isirka, diinta, midabka, caqiidada, asalka, xaalad guur, xaalad qoys, naafo xaalad loo tixgalinayo kaalmada dadweyne, rabitaanka galmo, aqoonsiga jinsiga, ka mid ahaanshaha ama ku hawlanaanta komishanka xuquuqda aadanaha, ama macluumaadka hidaside. Iskuulku wuxuu sidoo kale mabnuucayaa dacaayada. Nidaamka iskuulka ee waxkaqabashada warbixinaha dhaqamadani waxay ju jiraan xeerka Maamulka ee qodobka 503.4AR (Administrative Regulation 503.4AR), ee Khashkhashaada, Dad kala sooca, Gacan qaadka, ama Jirabaada. Mar marka qaarkood, falalka caynkaa ahi waxa ay hoos tagaan labadaba Xeer Maamulka 503.4AR qanuunka khashkhashaadka, takoorka, rabshadaha, dayaacada, iyo cawaandiyada. Xaaladahaan oo kale, baaritaanka labada xeer midkood ayaa loo qaadan karaa in lagu fuliyo shuruudaha labadoodaba.

Tixraacyada:
- Minnesota Statute 120B.232, Wax Barashada & Kobcinta Dhaqan Wanaagsan (Character Development Education)
- Minnesota Statute 121A.03,Khakhashaadaha Galmada, Isirka, Diinta iyo Gacan Qaadka la xiriira (Sexual, Religious and Racial Harassment and Violence)
- Minnesota Statute 121A.031, Nidaamka Maagida Ardayda Iskuulka (School (Student Bullying Policy)
- Minnesota Statute 121A.0311, Ogaysiiska Xaquuqda iyo Mas'uuliyada Saaran Ardayga iyo Waalidka sida uu qabo Sharciga Amaanka yo Gargaarida Iskuulada Minnesota (Notice of the Rights and Responsibilities of Students and Parents under the Safe and Supportive Minnesota Schools Act)
- Xeerka Minnesota 121A.0312 Habdhaqanka Gardarrada Iyo Xumaan U Geysashada Qofka
- Minnesota Statute 121A.40-121A.56, Sharciga Xaq u Eryada Ardayga (Pupil Fair Dismissal Act)
- Minnesota Statute 121A.69, Nidaamka ka degsan Jirabaada (Hazing Policy)